

Passport ayaa Kuu adeegaysa inta lagu jiro aafada COVID-19

Ayadoo aafada caabuqa korona fayras (COVID-19) ay ku faafayso Kentucky, dadka ka tirsan Passport maaha inay ka walwalaan qarashaadka ka baxaaya.

Waxaan ku siinaynaa adeegyada soo socda:

- **\$0 lacag ah ayaa lagaaga jaranayaa dhammaan adeegyada**

Ma jiraan **WAX** lacag qayb aad ku bixinayso caymiska waqti xaadirkaan si aad u hesho adeegaad rabto. Uma baahnid inaad ka walwasho wax lacag ah oo caymiska lagaaga goosto, qayb aad caymiska bixiso, ama qarashaad kale oo qarsoon!

- **Adeegyada caafimaadka taleefanka ee bilaashka ah**

Adeeg bixiyeyaal badan oo katirsan ururka Passport ayaa baxsha adeegyada darteelka taleefanka lagu baxsho si aadan gurigaaga uga bixin si aad daryeel caafimaad u raadsato. Wac dhakhtarkaaga oo waydii haddii ay baxshaan adeegyada caafimaadka ee taleefanka.

- **Taageero Bilaash ah 24/7 – Laynka Talada Kalkaalinta, Helitaanka Caafimaadka Habdhaqanka, Laynka Masiibada Caafimaadka Dhimirka**

Waxaad heli kartaa caawimaad lagaa siinaayo baahiyahaaga caafimaadka dhimirka iyo dabeecada 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii. Waxaad wici kartaa wax kamid ah lambaradaan:

Adeegyada Xubnaha

1-800-578-0603 TDD/TTY: 711

Waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jamcada, inta u dhaxaysa 7da subaxnimo iyo 7da fiidnimo (EST)

Laynka Talada Kalkaalinta ee 24 saacadoo shaqeeya

1-800-606-9880 TDD/TTY: 1-800-648-6056

Laynka Masiibada Caafimadka Dhimirka 24 saacadoo shaqeeya

1-844-231-7946 TDD/TTY: 1-866-727-9441

Laynka Helitaanka Caafimaadka Dhimirka

1-855-834-5651 / TDD/TTY: 1-866-727-9441



- **92-ee dalabka boostada ee daawooyinka laguu qoro ama tafaariiqda ah; farmashiyaasha qaar ayaa keenaaya**

Waxaad heli kartaa daawooyinka laguu qoro adoo adeegsanaaya boostada haddii aadan doonayn inaad baxdo ama aadan awoodin inaad aado farmashiyahaaga maxaliga ah.

- Waxaad wici kartaa dhakhtarkaaga si aad iskaga qorto dalabaadka boostada.
- Waxaad wici kartaa farmashiyahaaga si aad u badasho taariikhda dawada laguu qoro ood ka dhigto 92 maalmood halkii ay ka ahayd 30 maalmood.
- Haddii aad wax dhib ah ku qabto helitaanka dalabka boostada ama daawada 92 maalmood ah, wac Adeegyada Xubinta ood ka helayso 1-800-578-0603.

- **Si aad u hesho ilaha cuntada, caawimaada dhaqaalaha, talo bixinta xanuunka adeegsiga maandooriyaha , waxbarashada carruurta, iyo arimo kale**

Waxaan aad uga shaqaynaynaa si aan ku helno illo lagugu caawiyo inta lagu jiro waqtigaan. Haddii aad u baahan tahay caawimaad in lagaa siiyo helitaanka adeegyadaan, fadlan:

- Wac Adeegyada Xubinta ood ka helayso 1-800-578-0603 (TDD: 711)
- Booqo <https://passporthealthplan.com/resources-for-coronavirus-closures/>
- Wac Adeegyada Wada Shaqaynta Bulshada Deegaankaaga Booqo <https://passporthealthplan.com/advocates/advocate-representatives/> si aad u hesho wakiilka aagagga.

- **Xogag joogto ah oo ku aadan baraheena bulshada**

Nagu xirnoow si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay ee caafimaadka iyo caymiska ah oo muhiim ah, tilmaamo, illo adeeg, iyo kuwo badan. Nagala soco Facebook, Twitter, Instagram, iyo LinkedIn!

